SOMALI

# Ka shaqaynta Finland

Ku xisaabtan arrimahan soo socda, marka aad Finland shaqo u imaanayso.




Ali

# Kahor aadista Finland

## Uma baahnid in aad lacag siiso dallaalka shaqada

Ma ahan in aad wax lacag ah siiso dallaalka booska shaqada ama qof ama shirkad shaqo kuu fidisay. Sida sharciga Finland uu dhigayo, marnaba qofka lacag lagama dalban karo, xittaa marka uu dalkiisa ku laabto kaddib. Kharashkaada kaliya waa

- **lacagta codsiga**
- **lacagaha dukumentiyada la xiriira iyo**
- **tikidka safarka ee Finland lagu imaanayo.**

Kaydso dhammaan lacagaha aad bixisay rasiidkooda.

## Heshiiska shaqada, mushaarka iyo shuruudaha shaqada

Inta aad bixin kahor hubi, in shaqada laguu ballanqaaday ay tahay mid dhab ahaan jirta. Haddii aadan hubin, la xiriir safaaradda Finland ee kuugu dhow.

Ka hubi mushaarkaada iyo wakhtiyada shaqada

- **heshiishka shaqada**
- **shaqada laguu fidiyay ee aan laga laaban karin**
- **foomka TEM054 ama**
- **foomka TY6_plus ee lifaaqa ah (shaqo-xilliyeed).**

Mushaarkaadu waa in uu ku filnaadaa noloshaada. Maciishaddu Finland waa qaali.

Shaqo-bixiyuhu gadaal dambe kama samayn karo heshiis shaqo oo kii hore ka xun. Mushaarka iyo manfacyada kale waa la wanaajin karaa.

Dhammaan shuruudaha shaqada waa in warqad lagu qoraa ama tusaale ahaan iimayl. Kaydi oo xafid dhammaan warqadaha iyo iimayllada. Haddii muran yimaado ayaa kuwaas loo baahanyahay.

# Marka aad Finland imaanayso

## Heshiiska shaqada iyo billaabista shaqada

Waxaad shaqada Finland ka billaabi kartaa, marka aad hesho sharciga deganaanshaha, caddaynta shaqo-xilliyeedka ama fiisada shaqo-xilliyeedka. Haddii aad shaqo u imaanayso ugu badnaan saddex bilood, uma baahnaanaysid sharciga deganaanshaha. Ka hubi arrintan Hoggaanka socdaalka migri.fi/en/work-without-residence-permit (af ingiriis).

Finland waxaa mushaarka iyo shuruudaha shaqada ka heshiiya ururada shaqo-bixiyayaasha iyo shaqaalaha. Waxay dejiyaan heshiiska shuruudaha shaqada, kaas oo looga heshiinayo, sida mushaarka ugu yar ee shaqada iyo wakhtiyada shaqada. Inta badan mushaarku waa in uu noqdaa ugu yaraan 8 yuuro saacaddii. Waxaa kale oo mushaar laga bixiyaa wakhtiga tababarka shaqada.

Finland waxay shuruudaha shaqada ku qoran yihiin hagaha hay'adda badbaadada shaqada ee Shaqaale ajnabi ah ku joogista Finland tyosuojelu.fi/work-in-finland.

Shaqaalaha iyo shaqo-bixiyuhu waxay wadajir u samaynayaa heshiis shaqo oo rasmi ah. Waxaa wanaagsan in heshiiska shaqada qoraal ahaan loogu qoro luqad aad fahmayso. Shaqo-bixiyaha iyo shaqaaluhu waa in ay heshiiska saxiixaan. Heshiiska afka ah xittaa wuu qabanayaa labada dhinac, laakiin waxaa adag in taas la caddeeyo.

Ha saxiixin heshiiska shaqada ama warqado kale, haddii aad fahamsanayn waxa ku qoran. Weydii, haddii meelaha qaar waxa ku qoran aanay kuu kala caddayn. Haddii hadal ahaan loo gelayo heshiiska shaqada, shaqo-bixiyuhu waa in uu ku siiyaa sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan shuruudaha shaqo qabashada. Haddii aadan helin sharraxaadda xittaa adigoo codsaday, la xiriir hay'adda badbaadada shaqada.

Shaqo-bixiyuhu koobi wuu ka qaadan karaa baasaboorkaada iyo sharcigaada deganaanshaha, laakiin ma haysan karo. Balse waad u dhiiban kartaa baasaboorkaada shaqo-bixiyaha si uu meel kuugu dhigo, haddii ay sidaas kuu ammaan badantahay, deegaan wadajirka ah oo deggantahay dartiis.


WORK CONTRACT
38h/week
2200€



## Xuquuqda iyo waajibaadka shaqo-bixiyaha iyo shaqaalaha

Haddii aad tahay ajnabi waxaad shaqada ku leedahay xuquuq iyo waajibaad lamid ah kan qofka Finnishka ah, xittaa haddii aadan haysan sharciga deganaanshaha.

Finland waxaa goobaha shaqada ilaaliya hay'adda badbaadada shaqada. Mar kasta waad la xiriiri kartaa hay'adda badbaadada shaqada, haddii aad dhibaatooyin kala kulanto goobta shaqada. Tusaale ahaan marka mushaar aad u yar shaqada lagaa siiyo ama haddii aanay shaqadu ahayn mid ammaan ah. Haddii aad doonayso waxaad la soo xiriiri kartaa adigoo magacaada qarinaya.

Waad ku biiri kartaa ururka shaqaalaha dhowr bilood oo shaqo ah kaddibna waxaad ku biiri kartaa khasnadda shaqo la'aanta. Khasnadda shaqo la'aanta waxaad ka heleysaa lacag maalmeed, haddii aad shaqo la'aan noqoto. Ururka shaqaaluhu wuxuu ku caawin karaa haddii aad dhibaato kala kulanto shaqo-bixiyaha

Shaqo-bixiyuhu waa in uu ku dadaalaa ammaanka shaqada. Waa in lagu baraa xaaladda shaqada, awaamiirta iyo qalabka goobta shaqada. Waa in sidoo kale lagu geliyaa caymiska shilka shaqada.

Finland, wakhtiga shaqadu waa ugu badnaan 40 saacadood todobaadkii. Inta goobta shaqada la joogo oo dhan waxaa loo xisaabinayaa wakhti shaqo, inkastoo aadan markaas haysan macaamiil ama shaqo. Waxaad todobaad kasta leedahay maalmo nasasho ah, yacni shaqada lama joogo maalmo fasax ah la'aantood. Waxaa kale oo kuu uruuraya fasax sannadeed, kaas oo wakhtiga aad ku jirto aad mushaar ku qaadanayso.

Waxaad qabanaysaa oo kaliya shaqada lagu heshiiyay ee ku qoran heshiiska shaqada. Sharciga iyo heshiisyada ayaa dhigaya, in qabashada shaqo dheeraad ah ay u baahantahay oggolaanshahaada. Waa in sidoo kale shaqada dheeraadka ah lagaa siiyaa magdhow waafaqsan heshiisyada. Si fiican ula soco oo hubi, in aad mushaar ka heshay dhammaan saacadahaadi shaqada. Waxaa kale oo wanaagsan in aad hubiso tirada maalmaha fasaxa.

Saacadahaada shaqada ku qoro maalin kasta buug ama telefoon. Waxaa kale oo aad sawir ka qaadan kartaa liiska kaltanka shaqada ee lagu qoray saacadaha shaqada. Macluumaadyadan gadaal dambe ayaad uga baahan kartaa.

Qofna kuguma qasbi karo galmo ama dembi. Hanjabaadda iyo xoog-sheegashadu xittaa waa dembi marka goobta shaqada la joogo. Xaq ayaad u leedahay in aad si xor ah u dhaqdhaqaaqdo marka aadan shaqanayn.

Haddii laguu hanjabo, tag meel nabad ah oo goobta shaqada ka baxsan kaddibna wac lambarka gurmadka degdegga ah ee 112. Caawimaad waad heleysaa, xittaa haddii aadan haysan sharciga deganaanshaha ee Finland.

## Akoonka bangiga iyo bixinta mushaarka

Finland, mushaarka waxaa lagu bixiyaa akoonka bangiga (gacanta waxaa laga bixin karaa tusaale ahaan mushaarka shaqo-xilliyeedka). Akoonka bangigu waa mid qofka u gaar ah. Qofna xaq uma lahan in uu isticmaalo akoonkaada, kaarkaada bangiga ee mashiinka otomaatigga ama erey-sireedyadaada bangiga.

Waa in mushaar kasta oo lagu siiyo ay la socotaa xisaabta mushaarka. Waxaa xisaabtaas ka muuqata

- **mushaarka (iyo sida loo xisaabiyay)**
- **dheeraadyada**
- **faa'iidooyinka (tusaale, deegaanka)**
- **canshuurta**
- **lacagaha ee uu bixintoodu sharcigu dhigayo.**

Shaqo-bixiyuhu mushaarkaada kama jari karo kharashaad sharciga ka soo horjeeda. Shaqo-bixiyuhu mushaarkaada dib uma isticmaalayo isagoo ka wareejinaya akoonkaada una wareejinaya akoon kale.

Haddii aadan shaqo-bixiyaha ka helin xisaabta mushaarka xittaa adigoo ka codsaday, la xiriir hay'adda badbaadada shaqada.



## Haddii ay xaaladdaadu is-beddesho

Samee wakhti hore codsiga cusub ee sharciga, marka uu sharcigaada deganaanshuhu dhici rabo. Tus shaqo-bixiyaha caddaynta codsiga cusub iyo sharcigaada deganaanshaha, marka aad sharciga hesho

Si xornimo ah ayaad shaqadaada uga ruqsaysan kartaa. Inta badan wakhtiga ka ruqsaysashada shaqadu waa 14 maalmood. Xaqaada joogitaanka dalka ayaa markaas dhammaan kara, haddii aadan haysan shaqo kale oo cusub ama sababo kale oo aad Finland ku sii joogto. Shaqada cusub waxaad inta badan ka codsan kartaa isla xirfaddii aad ku shaqaynaysay oo kaliya. Haddii aad xirfadda beddelanayso, waa in aad codsataa sharciga deganaanshaha oo cusub.

La xiriir hay'adda ilaalada shaqada, haddii shaqo-bixiyahaadu aanu u hoggaansamin sharciga ama heshiiska. Haddii goobtaada shaqada dhexdeeda laguugula dhaqo qaab dembi ah, waxaad talo weydiin kartaa telefoonka dhibanayaasha ka ganacsiga dadka oo ah +358 295 463 177 ama bogagga shabakadda (ihmiskauppa.fi/en). Marka ay xaaladahaas jiraan waxay u badantahay in aad sii wadan karto joogitaankaada dalka shaqo-bixiye kalana aad u wareegi karto.

Haddii aad ka shakiso in aad noqotay dhibane dembi, la xiriir booliska (lambarka gurmadka degdegga ah 112). Waxaad sidoo kale Heeganka dhibanaha dembiga kula xiriiri kartaa iimayl (help@riku.fi) iyo telefoon ama farriin qoraal ah (tel. 040 632 9293).

Bogagga internetka ee heeganka dhibanaha dembiga iyo ka ganacsiga dadka waxaad farriinta ugu soo qori kartaa luqaddaada ama waxaad heli kartaa turjubaan ku caawiya. Cidna looma sheegayo haddii aadan oggoleyn xiriirka aad soo samaysay.

## Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqda shaqaalaha ee Finland

**Muuqaal kartuun ah (luqado badan):**
riku.fi/en/various+crimes/labor+exploitation

**Hoggaanka socdaalka:**
Tilmaanbixinnada iyo macluumaadyada xiriirka oo ku qoran finnish, iswiidhish iyo ingiriis: migri.fi/en/problems-at-work-

**Hay'adda badbaadada shaqada:**
Hagaha shaqaale ajnabi ah ku joogistaFinland oo luqado badan ku qoran: tyosuojelu.fi/work-in-finland
Telefoonka talabixinta ee hay'adda badbaadada shaqada
0295 016 620, tyosuojelu.fi/web/en/home

**Heeganka dhibanaha dembiga:**
riku.fi/laborexploitation, telefoon 040 632 9293

**Nidaamka caawinta dhibanayaasha ka ganacsiga dadka:**
ihmiskauppa.fi/en, telefoon +358 295 463 177

**Talabixinta xiriirka shaqada ee SAK:**
tyoelamanpelisaannot.fi/en, telefoon 0800 414 004

## Lambarka guud ee gurmadka degdegga ah ee Finland: 112

RIKU

RIKOSUHRIPÄIVYSTYS
BROTTSOFFERJOUREN

Ministry of Economic Affairs
and Employment of Finland